WORLD BANK GROUP

Dukumanti lagu shaqaynayo xiliga tabobarka

Haykalka Siyaayadeed ee Wadamada Qaniga ah

Diyaarintii: Kevin Carey

“Aqoon kobcin ku saabsan Maamulka Khayraadka Shidaaalka”

.

Khayraadka aan dib loo soo celin karin waa kuwa gabi aahaanba la isticmaalo kaas oo halis ugu jira duugow, wadamada qaniga ku ah khayraadka (Resource Rich Countries) ama (RRCs) waa in ay ahmiyada siiyaan si ku talo galka ah khayraadka cayimiman ee jiilka maanta iyo kuwa soo socda*. Tani waxay saameyn ku leedahay go'aanka ah intee ayay tahay in aynu iticmaalno ama kaydino mudada lagu jiro wax soo saarka, iyo sida loogu qoondaynayo kaydka hantida kala duwan ee aynu haysano. Ku darsoo, wadamada qaarkood baahida loo qabo kayd maaliyadeed waxa ay ka timaaddaa caadidis muddo dheer oo ka yimaada maaliyadda dawladda, sida dadwaynaha gaboobaya iyo kororka kharashaadka daryeelka caafimaadka.*

1. ***Baadhitaanka/ogaanshaha sii jiritaanka maaliyadda wadamada qaniga ku ah khayraadka (RRCs)***.

Daraasaynta waaritaanka maaliyadda wadamada horumaray iyo kuwa kalee kor u soo kacaya waa mid ku salaysan saadaal muddo dhex dhexaad ah khusaysa oo la xiriirta saamiga inta ay daynta dawladu ka tahay wadarta wax soo saarka dalka (GDP) marka la eego odoroska xaaladda dhaqaalaha guud iyo malayaasha lagu saleeyay siyaasadda maaliyadda. Habka Bangiga Aduunka iyo Hay'ada Lacagta Adduunka ay u daraaseeyaan daymaha joogtada ah, ama (DSA) waa mid la xiriirta darsidda jidka la filayo in ay marto saamiga dayntu mudada dhaxe si loo qiimeeyo in siyaasada maaliyadeedda la sii wadi karo marka ay duruufo guud oo dhaqaale iyada oo aan la curyaaminayn awoodda dawladdu ay iskaga bixinayso daynta fog iyo isku dheeli tirnaanta dhaqdhaqaaqa dhaqaalaha dalku uu la leeyahay dibaddiisa.

Hay'adda lacagta (IMF) iyo Bangiga Aduunku waxa ay ku taliyeen nidaam gaar ah oo khuseeya joogtaynta daymaha wadamada dakhligoodu hooseeyo. Habka wax lagu cabiro ee lagu ogaado u nuglaanshaha daynta ee la soo saaray sanadkii 2005 wuxuu ka kooban yahay xirmo qiyaaso siyaasad ku tiiran oo wax tusinaysa kuwaasi oo odoroska daymaha qaranku dibbada ka soo qaato la barbar dhigo si loo qiimeeyo khatarta culays ee deyntu leedahay. Unuglaanshaha mushkiladaha dibadda ka yimaadda iyo kuwa siyaasadda la xidhiidha waxa lagu daraasayn doonaa tusaalaal/xaalado kala duwan**.**

Wadamada qaniga ku ah khayraadka, gaar ahaan kuwa wax-soo-saarkoodu kooban yahay, waa in sii jirtaanka maaliyaddooda daraasadda lagu samaynayo lagu daro idlaashaha khayraadka aan dib loo soo-celin/cusboonaysiin karin. Mucaamaladan gaar ka ahi waa muhiim marka la eego ahmiyadda ay u leedahay dakhliga maaliyadda la xiriira ee lacagta dawlada. Mudada la odorosayo waa in laga dhigaa mid dheer, kana badan mudada dhex dhexaadka ah ee loo isticmaalo qiimeynta daynta mudada dhexe ee wadamada kale, sababta oo ah khayraadka aan dib loo cusboonaysiin karin waxa uu keenayaa inay soo baxaan arimo khuseeya sida wax loogu kala qorshaynayo jiilalka kala duwan taas oo u baahan in la isticmaalo habab/go'aamo xiliyada (waqti hore, hadda, iyo mid soo socda) kala duwan khuseeya. Tani waxay awood ku meel marinaysaa in la qaato shuruudo cad oo ku saabsan daryeelka xiliyada kala duwan ee lagu eegayo khayraad intee le'eg ayay tahay in aynu isticmaalno hadda marka la barbar dhigo inta aynu u kaydinayno jiilka dambe.[1]

Hawlgallo dhawr ah oo la xidhiidha joogtaynta maaliyadda ee wadamada qaniga ku ah khayraadka ayaa lagu saleeyay malo-awaalka dakhliga joogtada ah (Permanent Income Hypothesis (PIH). Hababkani waxay qiyaas qaadasho u noqonaysaa isku-dheeli tirka khusaysa wixii aan ahayn khayraadka aasaasiga ah (NRPB) ee waligeeda la maal-galin karo. Hababka isku-dheeli tirka khusaysa wixii aan ahayn khayraadka aasaasiga ah (NRPB) waxaa lagu qeexaa dakhliga aan aheyn ka khayraadka oo laga gooyay kharashaadka wixii aan khayraad aheyn marka laga reebo wixii ku baxa dulsaarka. Soo saarayaasha saliiddu tan had iyo gooraale waxay ku calaamadiyaan mid aan aheyn hoos u dhac saliideed. Sumadaas laga qiyaas qaadanayo qeexitaankeedu waa isku-dheeli tirka khusaysa wixii aan ahayn khayraadka aasaasiga ah (NRPB) oo joogto ah sanad walba kaas oo laga soo dhiraan dhiriyay hantida saafiga ah ee dawladdu filayso—qiimaha ay hadda marayso dakhliga maaliyadda siilada ee

[1] DSAs dhaqanka dalalka kale ku daraan doorasho daryeelka intertemporal si dadban , tusaale ahaan ku talineyso in xasilinta daynta in ratio GDP ee ah " Ninkii miyir leh " heer . Soo jeedintan sidadban aasaasiga ah ee hawlaha mas'uuliyadaha deyn bixinta dhexeeya ab hadda iyo mustaqbalka sida caadiga ah in aan la sameeyey cad

mustaqbalka la filayo oo loogeeyay qiimaha go'an/saafiga ah ee haynta/hantida maaliyadeed ee dawlada.

Hababka male-awaalka mudada fog ee joogtaynta maaliyadda ayaa iyagu aan kala soocayn isticmaalka iyo noocyada maalgashiga ee NRP wanaa laga hor yimi. Waxa muuqata bar-qiyaaseedka maaliyadeed ee hababkani ay inaga doonayaan in ku culustahay wadamada dakhligoodu hooseeyo ee qaniga ku ah khayraadka sababta oo ah waxay iska indho tireen baayihaha horumarineed ee mustaqbalka fog ee dalalka raasamaalkoodu yaryahay ee caqabaddu ka haysato in ay helaan dayn maalgashi iyo doorka mustaqbalka ee maalgashiga dawlada ee wax-soo-saarka lehi ku yeelanayo dalalkaasi. Gaar ahaan, marka ay jirto yaraansho raasamaal oo dhaqaale, waxay u badan tahay in macaashaka laga helo raasamaalka guduhu ee dalku uu noqodo mid aad u sareeeya kaas oo aad uga sareeya xaddiga dulsaarka ee aduunka. Sidaa darteed, waa muhiim kala qoondeeyta dhigaalka dawlada wakhtiga lagu jiro wax-soo-saarka kaas oo ay siyaasiyiintu u kala qoondeeyaan dhigaalka saafiga ah ee hantida maaliyadda qalaad iyo in lagu maalgaliyo dadka iyo dhismayaasha dalka si loo dhiiri galiyo koboc dhaqaale.

Wadamada qaniga ku ah khayraadka ee dakhligoodu hooseeyo, dakhliga maalgalinta khayraadka ee dalka waxa uu hoos u dhigi karaa hoos u dhaca balaadhan ee ka jirta maalgalinta kaabayaasha dhaqaale iyo dadka. Maalgashigu wuxuu hoos u dhigi karaa yaraanshaha raasamaalka dalka, wuxuuna kor u qaadayaa koboca dhaqaale ee ka yimaadda meelaha aan aheyn khayraadka, wuxuuna kor u qaadayaa dakhliga maaliyadeed. Xaaladahan oo kale, NRPB-ga ugu sareeyaa waxa uu ka hoosayn doonaa NRPB-ga bar-qiyaaseedka ah ee ay ku taliyaan hababka malo-awaalka dakhliga joogtada ahi (PIH) gaar ahaan marka la sii kordhiyo maalgashiga wax-soo-saarka leh ee dawlada, waa haddii ay dawladu ka helayso saamigeeda faa'iidada kasoo baxda korodhka dhaqaaluha ee dheeradka ah.

Noocyo la dhalan-gadiyay oo ka mid ah nidaamka malo-awaalka dakhliga joogtada ah (PIH) ayaa la qorsheyn karaa si loogu ladho kordhinta maalgashiga dawlada oo looguna ogolaado kharash xagga hore laga bixiyo oo uu maalgalinayo RR. Hababkani waxa ay ka soo qaadayaan in ay "xaalada ugu xun" wax u dhacaan, markaas oo kor-u-qaadidda maalgalinta dawladu aanay wax saameyn ah ku yeelan koriinka dhaqaale. Ama waxa laga soo qaadi karaa in haddii kor loo qaado maalgashiga ay saameyn fiican ku yeelanayso koriinka, taasi oo keenaysa in kor u kac ku yimaado dakhliga aan aheyn khayraadka, taasina waxay keenaysaa in uu kordho kharashka shaqadda iyo dayactirka ee maalgalinta dheeraadka ah ee dawladdu samaynayso.

Ugu dambeyntii, hubaal la'aantu waxay kor u kacdaa mar maksat oo mudada la saadaalinayaa sii dheeraataba, hubaal la'aanta ku xeeran hawlgaladda jiritaanka/waaritaanka mudada dheeri waa mid aad u tiro badan. Qiimeynta lagu sameeyo hantida laga helayo mustaqbalka dakhlita khayraadka waxa ku xeeran hubaal la'aan ka imanaysa qiyaaso badan oo wax lagu cabiro, oo ay ku jiraan qiimayaasha lagu iibin doono khayraadka mustaqbalka iyo kharashaadka wax-soo-saarku inta uu noqon doono, xadiga uu leegyahay khayraadka kaydka ah, nidaamka maaliyadeed ee lagu dabaqo waaxda khayraadka shidaalka, iyo waliba xadiga uu noqonayo dulsaarku. Marka la fiiriyo hubaal la'aantaas iyo hawlaha waxyeeladaha ah ee aan loo sinayn ee hore looga soo hadlay, adeegsiga hawlgallada jiritaanka mudada dheer ee loogu talo galay in ay caawinayso go'aan ka gaaridda qorshayaasha siyaasadda maaliyada waa in lagu daro taxaddir iyo il-dheeri.

2. Maalgashiga Dawladada iyo Waaritaanka

Tayada maalgashiga dawladu waa u muhiim korriinka dhaqaalaha. Cadamaha tirokoobyada dhaqaale ayaa ku talinaya tayada maalgashiga dawladu, in lagu qiyaaso is bad bedelka iyo filaanshaha marka la doorayo mashquuca iyo fulintiisaba, qiyaas ahaan waa muhiim in la qeexo farqiga u dhaxeeya koriimada dhaqaale, iyada oo looga qiyaas qaadanayo inta badan wadamada dakhligoodu hooseeyo.

Ma keenayaa maalgashiga dawladu in dakhli maaliyadeed oo waara? Hadii kharashka cayiman ee ina soo galayaa ee kor u qaadista maalgashigu la weyn yahay kharashkii kal hore ee cayinaa, hantida cayiman ee dawladu kolka kor u qaadis lagu sameeyo maalgashiga waxay noqon kartaa mid ka badan maqnaanshaha maalgashiga. Taasi waxay ku xiran tahay in sharashka la isticmaalay saameyn taban ku lee yahay koriimada dhaqaale iyo in dawladu ka hesho dulsaar faa'iido koriinka dhaqaalaha. Dulsaarta maalgashiga waxaa ku jirta cashuurta dakhliga ee laga helo dhaqaalaha sida fiican u socda iyo kuwa ka faa'iidaysanaya, hadii ay jirto..

Jiritaanka faa'iidada koriinka waxay ka timaadaa hadii maalgashiga dawladeed yahay mid si fiican u shaqaynaya. Maamul xumada dawladeed, waxay dhaawac ku tahay guud ahaan habka maalgashiga ee dawlada iyo in ay ciriiri galiso isu socodka taasina ay wiiqdo hanaanka wanaagsan ee maalgashiga. In xaaladan oo kale la xoojiyo maalgashigu waxay keenaysaa un tayo xumo,sidoo kale waxay wax u dhimaysaa in loo badalo khayraadka dabiiciga ah hanti dawladeed oo si fiican u shaqaynaysa, intii laga dhigi lahaa dhaqaale sii jiraya, waxay sababaysaa in khayraad badan la dayaco. Korimaada deg dega ah ee maalgashigu waxay guud ahaan dhaqaalaha ku keentaa degenaansho la'aan mid qarka u saaran in uu dumo ayna sababta saameynta xanuunka loo yaqaan (Dutch disease effect) guud ahaana saameyn ku yeelato koriimada dhaqaale ee wakhtiga dheer.

Xiliga koriimada dhaqaaluhu waxay keentaa in dakhligu kordho hadii uu sareeyo dakhliga laga helayo cashuura iyo dakhli ururinta, iyo hafii dakhliga inoo soo noqonayaa uu daboolo kharashaadka mashaariicda mustaqbalka.

- Hadii dakhliga intiisa badan lagu lumiyo iyada oo laga dhaafo cashuurta macaashka, ama cashuur dhaaf, meelaha ka caagan cashuuraha, ama aan aan cashuurta si wanaagsan loo ururin (khaasatan wadamada dakhligoodu hooseeyo ama uu aad u liito habka cashuurta ee waxyaabaha aan aheyn khayraadka), koriimo dhaqaale kama imanayso dulsaarta faa'iidada maalgashi dakhliga sareeya ee maalgashi waxaana laga yabaa in uu sameeyo waaritaanka maaliyadeed ee dhaqaalaha.

- Waa u muhiim dawlada in ay hesho faa'iido soo gasha si loogu maalgaliyo mashaariicda mustaqbalka, dayactirka iyo hoos u dhaca kharashaadka ee la xidhiidha mashaariicda dhameystirantay. Dakhliga la filayo in uu ka yimaado maalgashigu waa in uu daboolo koriimada kharashaadka la gali doono si ay saameyn taban ugu yeelato qul qulka lacagta sidoo kalana waaritaanka dhaqaalaha.

Sanduuqa 1. Habka jiritaanka ee maalgashiga

Markasta oo laga hadlayo habkan waa in xisaabta lagu darsado marka la joogo wadamada soo koraya, oo ay ku jirto waxtar la'aanta maalgashiga dawladeed, caqabadaha haysta tayaynta hay'adaha maaliyadeed, habka cashuur ururinta, iyo xanuunka loo yaqaan Dutch ee (berg iyo kuwa kale xuseen 2012). Waxay soo jeedinaysaa in kor loo qaado maalgashiga dawladeed iyadoo la barbar wado dhisida tayada hay'adaha maaliyadeed iyo in qayb ka mid ah khayraadka dhigaal loo haysto.

Habkan jiritaanka maalgashigu waa in lagu daro qaab lagu cabiro tayada maalgashiga iyo nidaam si cad looga arki karo manfaca. Waxa kale oo ka mid noqonaya qaab lagu ogaan karo in wadamada soo korayaa ay kor u qaadid deg deg ah ku sameeyeen maalgashiga (had iyo gooraale waa la arki karaa hoos u dhaca ku yimaada khayraadka), caqabadaha hor taagan tayaynta taasi oo keenaysa qorshe xumo taasi oo sababta korimaada kharashaadka maalgashi sidii aynu hore uga soo hadalnay. Cadeyn aan toos aheyn ayaa odhanaysa tani waxay xawli ka dhigaysaa hoos u dhac ku yimaada maalgashiga. Sidoo kale waxaa iyadna ku jirta in xisaabta lagu darsado kharashaadka lagalayo inta hawshu socoto iyo wali ilaalinta raasamaalka guud.

Habsami kor u qaadida iyo dardar galinta maalgashiga dawladu, wuxuu sii wakhti dawlada ku filan oo ay kor ugu qaado hufida ama wanaajinta maalgashiga dawladeed. Waxa kalooy siinaysaa awood u siinaysaa dhisida qaabkii looga ilaalin lahaa in dhib soo gaaro maalgashiga wakhtiyada uu isbadalka togon ku yimaado khayraadka.

Qoraagu wuxuu xooga saaray muhiimada in qiimeyn lagu sameeyo mashaariicda maalgalineed ee dawlada, faa'iidada maalgashiga iyo ogaanshaha caqabadaha hor taagan tayaynta. Waxay kale oo ay muujinaysaa kharashaadka lagalayo mashaariicda maalgalineed ee mustaqbalka in xisaabta lagu darsado, sida darteed faa'iidada laga helayo koriimada dhaqaale ee maalgalinta dawladu waa in ay noqoto mid sii jiraysa.

Nidaamka ama habka lagu cabiro xawaaraha intee in le'eg ayuu maalgashigu le'eg yahay iyadoo la eegayo guud ahaan dhaqaalaha iyada oo xisaabta lagu darsanayo caqabadaha hortaagan tayaynta.horumarineed. hal tusaale hadaan soo qaadano sida "habka maalgashiga mudada dheer". Habkani wuxuu kaa caawinayaa intee in le'eg ama xawaare intee le'eg ayaa kor loogu qaadi karaa si loogu badalo qayb ka mid ah khayraadka raasamaal dawladeed taasi oo kor u qaadaysa tayaynta wax soo saarka gaarka ah iyada oo la ilaalinayo degenaanshaha dhaqaale. Tani waa mid u muuqata in xisaabta lagu darsado in waxtar la'aanta maalgashiga iyo caqabadaha tayaynta xirfada taasi oo inta badan lagu arko wadamada horumaraya ee qaniga ku ah khayraadka (sanduuqa 1)

U dhug yeelashada nidaamka tusinaya in maalgashiga dawladu yahay mid adag. Tayo xumada maalgashiga waxay burin kartaa dooda ugu weyn ee ah in sare u qaadida maalgashigu ay sababto sare u kaca dhaqaale ee mustaqbalka. Rajaram iyo kuwa kale (2010) iyada oo ay xal ku haboon u helaysa iyo u jeedooyin lagu ogaanayo habka ugu haboon ee lagu qiimeyn karo maalgashiga dawladeed iyo sida loo maareyn karo nimaamka dawladaha (sanduuqa 2).

Sanduuqa 2. Habla lagu baari karo ama lagu qiimeeyn karo maalgalinta dawlada

Rajaram iyo kuwa kale (2010)* waxay na tusiyeen sideed dariiq "ay tahay in aad raacdo midkood" oo ah kuwa shaqeeya kuwa ugu caansan..: Silsilada maareynta maalgalinta dawlada waxaa loo kala jajabin karaa dariiqyada ugu muhiimsan, qoraayaashu waxay na siiyeen habka ugu haboon ee lagu ogaan karo (halkan laguma xusin) in lagu qiimeeyo. Dariiqyada maalgalineed waa kuwan.

- Hagaha maalgashiga, horumarinta mashruuca iyo darsida bilowga
- Qiimeynta caadiga ah ee mashruuca
- Qiimeyn iyo dib u eegis madaxbanaan
- Kharashka iyo doorishada mashruuca
- Fulinta mashruuca
- Isku sargoynta mashruuca
- Hawl galinta wixii sahlaya
- Dib u eegida dhameystirka aasaasiga ah iyo qiimeynta.

*http://documents.worldbank.org/curated/en/2014/09/20268592/power-public-investment-management-transforming-resources-assets-growth

Sidii aynu hore uga soo hadalnay, sareynta hubaal la'aanta qiimaha khayraadka iyo in ay adag tahay in la saadaaliyo xaalada suuqa caalamiga ah ee khayraadka. Sidaa darteed, kor u kaca maalgashiga wadamada uu hooseeyo dakhligoodu way in ay si taxdar leh u sii wadaan iyo iyaga oo dhisaya hab ka ilaaliya is badbadelka iyo iyaga oo meel adag iska taagaan isbadel kadis ah oo dibada kaga yimaada. Habsami kor ugu qaadida maalgashiga iyo habsami u socodka maalgashigu waxay yaraysaa is badbadelka ku dhaca maalgashiga dawlada sida lagu taliyay ee habka maalgashiga ku salaysan tani waxay sidoo kale hoos u dhigaysaa is badbadalka waxyaabaha aan aheyn wax soo saarka maalgashiga, taasi darteed waxay tayaysaa degenaanshaha dhaqaalaha.

3.Habka ama dhigaalka cayiman

Marka laga hadlayo habka loo marayo hantida qaranka, wadarta hantida qaran- lagu daray wax soo saarka, dabiicigaa iyo kuwa aan wali la taaban (dadka iyo hay'adaha) iyo hantida la qiimeeyay. Isbadalka ku yimaada hantida si fudud aya lagu ogaan karaa waana tan furaha u ah muujinaysana waaritaanka dhaqaalaha. Qiimaynta hantida ee muuqataa ee ay soo saareen Bangiga aduunku waxay odhanaysaa hantida uga badan ee aduunku waa waa mid aan la isticmaalin. Tusaale, muruqa dadka iyo tayada caadiga ah iyo taan caadiga aheyn ee hay'adaha. Qaybta dabiiciga ah ee hantidu waa wadarta hantida ka timaada dakhliga, halka uu sare u kacayo qaybta aan la taaban ee hantidu. Wadamada dakhligoodu hooseeyo, hantida dabiciiga ah (oo ay ku jiraan kuwa aan dib loo isticmaali karin) waa qayb muhiim ka ah wadarta hantida guud, iyo celcelis ahaan ka badan qaybta wax soo saarka ee hantida.

Hantida dabiiciga ah waxaa loo badali karaa noocyada kale ee hantida, kirada laga bixiyay hantida waa mid si fiican iyo si xunba loo maal galin karo. Kirada laga qaado hantida dabiiciga ah waa mid muhiim u ah ilaha horumarineed, wadama qaar waxay ku guulaysteen in ay hantidooda sidan u isticmaalaan, iyada oo siyaabo kala duwan loo jihanayo dhaqaalaha lagana dhawrayo in lagu tiirsanaado khayraadka ama in lagu talo galay in hoos u dhac ku yimaado**.**

Tan ugu muhiimsan waa ilaalinta hantida iyo sar goynta dhigaal. Wadamada qaniga ku ah khayraadka, ku tiirsanaanta hantida waxay sii adkaysaa qiimeynta kaydsashada iyo isticmaalka sababtoo ah hoos u dhaca khayraadka dabiiciga ah maaha mid laga arki karo qiimeynta hantida qaranka ama sanduuqa hantida qaranka. sargonaanta dhigaalka waa isku day lagu cabiri karo heer dhabta ah ee dhigaalka wadanka kadib hoos u dhaca macdanta, tamarta iyo kaymaha, hoos u dhaca hantida la soo saaray, awooda dadka ee la hawlgaliyay (iyada oo lagu cabirayo khibrada waxbarasho) dhibaatada soo gaadhay degaanka, joogtaynta taban ee sargoynta dhigaalku waxay nagu hagaysaa hoos u dhac ku yimaada hantida guud ee qaranka iyo hoos u hantida bulshada.

Cilmi baaris uu sameeyay Bangiga aduunku ayaa ku talinaysa in wadamada qaniga ku ah khayraadku ay intooda badan yihiin kuwa ka hooseeya saxaraha, taasi oo muujinaysa hoos dhac, iyo sargonaanta taban ee dhigaalka cayiman, xitaa wakhtiyadan dhaqaalahoodu sareeyo. Cadayntani waxay ku talinaysaa lumitaanka hantida xiliga dhaqaaluhu sida fiican u korayo. Celcelis ahaan, sanadkii 2008 koox ka kooban 21 wadamada soo saara badroolka iyo gaaska ayaa lagu qiimeeyay in ay soo wajihi doonto xaalad aanay miisaaneyn dhigaalkoodu.

- Kadib sargoyntii dakhliga guud iyada oo hoos u dhac ku yimid khayraadka dabiciiga ah, ninka la yidhaa Ley (2010) wuxuu ogaaday in wadanka saambiya hoos u dhac ku yimid, iyo in had iyo gooraale in dhigaalku wuu ku yimid hoos u dhac, tani waxay muujinasaa in hoos u dhac ku yimid hantida guud. Cilmi baaris uu sameeyay Lange (2004) ayaa soo saartay aragti la mid ah tan marka laga hadlayo dhaqaalaha zambia.

- Farqiga ayaa ah in wadanka bootuswaana u maamulay hantidiisa in lagu dhiso hanti qaran sida uu qabo (Lange 2004)

Siyaasado ku haboon ayaa loo baahan yaha si loo badalo isbadalada taban ee ku yimaada dhigaalka. Gaar ahaan, wadamada qaniga ku ah khayraadka dabiicigu waa in ay la yimaadaan siyaasado dhaqaale oo ku dhiirigalinaya dhigaalka,iyo siyaasado ku wajahan khayraadka taasi oo ku hagaysa in si quman is badal togan ku yimaado, dhaqaalaha dawlada ee ay hagayso kirada laga qaado khayraadka, iyo barnaamijyada maalgalineed taasi oo ka dhigaysa dakhliga hantida in sida ugu fiican loo isticmaalo, iyada oo aan laga tageyn hawl galinta tamarta aadamaha.

4. Nimaamka kharash gareynta mudada dhexe

Mudada dhaxe ee Miisaaniyad sanadeedu waa lagama Maarmaan.. Aad ayay muhiim u tahay in la sameeyo wacyi galin ku qotonta mustaqbalka marka la dajinayo habka miisaaniyad sanadeedka, si loo helo xog loogana doodo miisaaniyada iyo sida loo kharash garaynayo hantida dawlada.

Tilmaamaha gaar ka ah ee ay lee yihiin wadamada qaniga ku ah khayraadka waxay hoos ka xariiqaysaa muhiimada ay leedahay in la horumariyo habka siyaasada miisaaniyad sanadeedka la raacayo iyo caqabadaha soo wajaha wadamadaas. Sameynta nidaam isku xira miisaaniyad sanadeedka iyo qorshaha mudada dhaw iyo mudada fog iyo in loo kuur galo dhibka soo wajihi kara miisaaniyada waxay ka caawinaysaa in la sameeyo siyaasad u xaglinaysa wakhtiga dhaw iyo isbadalka ku yimaada dhaqaaluhu sida uu kor ugu qaado saameynta uu ku lee yahay miisaaniyada, iyo in kor loo qaado sida fiican ee loo maamulayo miisaaniyada iyo in dhamaan meel la iskugu keeno khayraadka dalalkaa.

Tani waa qayb muhiim ah oo ka mid ah qaab dhamaystiran oo miisaaniyadeed. Ta ugu muhiimsani waa horumarsanidan nidaamkan kaasi oo sheegaya waxa Banigaga aduunku mudo hore shegay ee aheyd in ta kali ah ee ugu muhiimsan ee sababta qorshe xumada miisaaniyada ka yimaadaa in wadamada soo koraya: waa in lagu guuldaraystay siyaasada, qorshaha, iyo miisaaniyada.

Marka laga hadlayo gaar ahaan wadamada qaniga ku ah khayraadka dabiiciga ah nidaamkani wuxuu ka caawin doonaa isku xidhka siyaasad miisaaniyadeedka ee ku qotanka mudada fog iyo siyaasadaha iyo in lala yimaado nimaad dhaqaale oo jiraya. Tani waxay kor u qaadaysaa in khatarta dhaqaale la daraaseeyo iyada oo la eegayo is bad badalka ku yimaada dakhliga. Iyo in ay na siiso habka uu dhisan yahiin hay'adaha maaliyadeed si loo ogaado mudada lagu jiro iyo tan fog iyo khayraadka aynu haysano hada gaar ahaan wadamada qaniga ku ah khayraadka.

Nidaamkan wuxuu ka caawinayaa wadamada qaniga ku ah khayraadka in ay gaadhaan u jeedooyinkooda in sidii hore kororka sanadlaha ee ku yimaada miisaaniyada in aan lagu tiirsanaan karin. Gaar ahaan:

- In kor loo qaado nimaamka misaaniyadeed si kharashka la isticmaalayaa u noqdo mid joogto ah, yaraanshaha in la helo khayraadka, ma keenayso in ay dhaqaaluhu hoos u dhac u sii socdo.

- In la hubiyo in dhamaan kharashaadkii loo baahnaa la hayo taasi oo ka dhigan in sida ay u kala mudan yihiin loogu sar gooyo siyaasada xiliga lagu gudo jiro.

- In la sameeyo nidaamka hay'adaha maaliyada si loo qiimeeyo waaritaanka miisaaniyada xiliyada kala guurka, xisaabtana lagu darsado in la qaabeeyo lana sameeyo qorshe maaliyadeed.

- Kor u qaadida daah furnaanta, iyo in si cad wax loo falanqeeyo, maamulka iyo la xisaabtan in uu jiro.

Waxaa jira saddex qaybood oo ugu muhiim habka kharash maamulida ee xiliga lagu jira taasi oo ku inta badan ka keenta in ay adkaato iyo baahid tayaynta. Bangiga aduunku wuxuu soo jeediyay nidaamyadan soo socda:

- Habka ugu fudud marka laga hadlayo habka maamulida kharashka ee xiliga lagu jiro waa waa nidaamka maamulida maaliyadeed ee xiliga lagu jiro. Waxay tani muhiim ama cadeyn u tahay u jeedada ah in qorshe siyaasadeed la sameeyo; qorshe miisaaniyadeed oo guud: iyo is dhex galka dhaqaalaha guud ee xiliga lagu jiro iyada oo miisaaniyad sanadeedka iyo qiimeynta tan sanadaha badan iyada oo laga hadlayo lana soo bandhigayo: halka miisaaniyadu ku wajahan tahay,ayaa dhaqaajinaya wadarta dakhliga, kharashaadka, iyo odorasida miisaaniyadaha kale, iyo khatarta miisaaniyada ku iman karta, in qiimeynta waaritaanka dhaqaalaha.

- Nidaamba maaliyadeed ee xiliga lagu jiro waxaa lagu daraa, laga bilaabo hoos sida ay u kharash garayeen baahida hay'adaha khayraadka iyada oo la isku miisaamayo khayraadka aan haysano.

- . Nidaamka sida shaqadu u socoto ee xiliga lagu jira waxa ka mid ah, qaybtu in ay yeelato u jeedooyin iyo nidaam u jeexan, iyada oo lagu darayo qaybaha gaar ka ah ama barnaamijkii ka soo baxay ama wixii ka soo baxay halka uu ku jihaysan yahay, iyada oo xooga la saarayo qiyaasaha iyo qiimeynta sida wax loo qabtay.

Xili dhaw cilmi baaris qoto dheer oo Bangiga aduunku sameeyay ayaa lagu sheegay in ay jirto saameyn togon markii la raacay habka nidaamka isticmaalka kharashka. Cilmi baaristani waxaa loo adeegsaday habab kala gadisan taasi lagu darsanayo cilmi baarisyadii ugu dambeeyay, laguna darsayo cilmiga dhaqaalaha iyo xaaladaha gaar ah oo ka dhacay dalka si loo qiimeeyo saameynta habkan si loo gaaro u jeedooyinka saddexda ah: hufnaanta miisaaniyada, isugu keenida khayraadka sida ugu fiican, farsamada ugu fiican.cilmi baaristan dhawaan la sameeyay waxay ku talinaysaa in nidaamkan u kor u qaaday nidaamka maaliyadeed iyo in si wanaagsan la isugu keeno khayraadka, halka maxsuulka qaybta wanaajinta farsamadu tahay mid adag. Darsadi xaalad iyo qiimeynteedu waxay muujinaysaa in habkani kor u qaaday nidaamka maaliyadeed, iyo in uu la qorshaha miisaaniyada iyo in kor loo qaado caqabadaha dakhli ee jira, iyo in la abuuro wada shaqeyn dhex marta hay'adaha dawlada. Iyo in si hufan loo isticmaalo kharashaadka, inkastoo kharashaadka ku jihaysan hay'adaha kala duwan uu kordho.

Nidaamka kharash gareynta ee xiliga lagu jiro maaha mid sanado badan ah mana abuuraysa in dhaqaaluhu taagnaado. Aragtida ugu horeysa waxa laga yaabaa in ay u muuqato in habkani in uu ku adkaado dabacsanaanta miisaaniyada wax ka badalkeeda ee wadamada qaniga ku ah khayraadka marka ay dakhliga ay soo food saarto isbadal la taaban karo. Waxa jirta aragti odhanaysaa in nidaamkani ku adkaan doonto istaacmaalka iyo qaabka loo kharash garaynayo miisaaniyada, iyo marka miisaaniyada wadamada qaniga ku ah khayraadka ay ku timaado waxaan la fileyn iyo is badal deg deg ah. Hasa yeeshee habkani maaha mid la adeegsan karo marka sanado dhawr ah la rabo in miisaaniyadooda la dajiyo. Kharash gareynta marka la gaarsiiyo halka ugu saraysa sanadaha ka dambeeya miisaaniyada sanadka hore waxay noqon mid aan ka badneyn mid hada. Horumarka aan la saadaalin iyo wax ka duwan wixii la saadaalinayay ee nidaamkan ee dhamaadka sanadka waa la qiimeyn karaa lana garan karaa iyaduu lagu sargoynayo nidaamkan marka ay jiraan duruufahani. Si ka fog in dhaqaaluhu noqdo mid gabi ahaanba taagan, iyada oo la balaadhinayo qoryaasha, hadaba habkani waa nidaam la adeegsado marka xaaladahani soo wajahaan wadamadan iyada oo uu noqdo habka ugu wanaagsan ee loo maareeyo miisaaniyada dalalkan.

Inta hadhay qaybtan waxay diirada saaraysaa doorka nidaamka kharash gareynta ee xiliga lagu jiro uu ka ciyaarayo tirada iyo khataraha soo wajihi kara iyo waliba xaaladaha waaritaanka dhaqaalaha ee mudada fog ee wadamada qaniga ku ah khayraadka.

5.Nidaamka kharashgareynta Xiliga lagu Jiro iyo khatarta soo wajahda Miisaaniyada.

Khatarta soo wajahda miisaaniyada waa si kooban lagu qeexi karaa-Xiliga lagu jiro isbadalka, farqiga ku yimaada miisaaniyada maaha kan la sii saadaalinayay ee miisaaniyada ama odoroska xiliga lagu jiro. Waa dawlada cida ay saameynta ku yeelanayso xaaladani ama dhacdadani taasi oo sababaysa isbadal in uu ku yimaada dakhliga dawlada, kharashaadka, iyo is miisaanka dhaqaale, hantida iyo waxa ay tahay in aad bixiso iyo waxyaabaha deeqaha aad u hesho. Khatarta ku timaada miisaaniyadu waa mid ka balaadhan kuwa la xidhiidha isbadalka ku yimaada khayraadka. Ilaha khataruhuna waa mid si guud uga muuqata dhaqaalaha (sida kuwa ka yimaada isbadalada aan la filayn ee dulsaarka iyo sarifka lacagaha) iyo kuwa la xiriira kharashaadka dawlada ee la gali doono, ganacsiga dawlada,iyo ismaamulada gaarka ah, bohoobida dawlada iyo shirkado gaar ah, nidaamka maaliyadeed, iyo masiibooyinka dabiiciga ah.

- Wadamada qaniga ku ah khayraadka waxay sharciyeeyeen ogaanshaha in ay jirto khatar maaliyadeed ama daymaha dawladu gali doonto ee ay tahay in la bixiyo oo ay ka mid yihiin

Australia, Canada, Chile, Colombia, Nigeria and Peru. Sida sanadkii 2009 kii, todoba wadan oo ay ku jiraan (kuwa dhoofiyo khayraadka aan dib loo cusboonaysiin) war bixin buuxda oo ku saabsan khatarta soo wajahda miisaaniyada si wada jir ah u soo saaray (Australia, Brazil, Chile, Colombia, Indonesia, New Zealand and Pakistan).

Nidaamka kharash gareynta xiliga lagu jiro waxaa si gaar ah loogu qaabeyn karaa si uu tiro ahaan ugana war bixiyo khatarta. Wadaman miisaaniyad sanadeedkoodu ku yahay mid sanadeed iyada oo aan xooga la saarin khatarta ku iman karta miisaaniyada una nugul dhaacawa miisaaniyada, waxay u baahan yihiin in ay diirada saaraan khayraadka ay qaniga ku yihiin isbadalada iyo xaaladaha aan la hubin ee iska dhici kara xiliga lagu jiro. Habkani wuxuu muhiim u yahay marka dakhligu isbadal muuqda oo aan la filayn ku yimaado. Dariiqa lagula tacaalayo khatarta miisaaniyada iyo unug laanshaha iyo qaabeynta siyaasado lagaga hortagayo ee aynu ku soo sheegnay qaybihii hore waa in la dhaqan galiyaa xiligan gudihiisa, taasoo ogolaanaysa tayaynta, waa in ay si buuxda ugu cadahay khatarta ku imaan karta miisaaniyada.

Helitaanka macluumaadka iyo doodaha khataraha la xiriira khayraadka aan qaniga ku nahay iyo kor u qaadida hufnaanta iyo xogta la isku qiimaynayo iyo sida ama habka loola tacaalayo khatarta. Fikrada siyaasad dhaqaale ee aad qabto, waxay kaa caawin doontaa in si taxadar leh aad u adeegsato siyaasada marka laga hadlayo isbad badalka ku yimaada khayraadka aan qaniga ku nahay. Xeel dheerayaashu waxay lee yihiin tayada iyo war bixintu waxay yaraysaa in la hubsado in khatarta la yareeaya iyo in si wanaagsan loo maareeyay. Siyaasiyiinta iyo sharci dajiyayaashu xiise badan uma qabaan in ay taageeraan kharashaadka badan ee siyaadaya xiliga dhaqaaluhu korayo hadii iyagu iyo dawladu ay bixiyaan cadaymo cad iyo sawirka ay bixinayso marka laga hadlay unuglaanshaha khatar dhaqaale iyo hoos u dhaca qiimaha khayraadka, isku sargoyntan miisaaniyadu waxaa loo baahdaa marka xaalad tan oo kale ahi jirto.

6. Habka Maamulida Kharashka ee Xiliga lagu Jiro iyo siyaasada Miisaaniyada Mudada fog.

Wadamo badan oo ka mid ah kuwa qaniga ku khayraadka dabiiciga ah waxaa jirta baahida in si xirfad leh loo falanqeeyo iyo in dooda waaweyn oo siyaasadeed laga yeesho si looga baaqsado mudada dheer. Wadamada dooda miisaaniyadoodu ay ku qotonto ama diirada saarto mudada gaaban, horumarinta hay'adaha ka shaqeeya si ay kor ugu qaadaan siyaasada ku dhisan mudada fog waxay ka caawin kartaa in si casriyaysan diirada loo saaro waxa dadku rabaan iyo qaababka loo xalinayo iyada oo la eegayo isticmaalka khayraadka. Tani waxay siinaysaa awood jiilka soo kacaya in ay codkooda ka dhiibtaan xaaladaha ay door bidayaan.

Jiritaanka badnaanshaha khayraadka dabiiciga ah wuxuu kaa caawin karaa awooda badan in aad saarto in dhibaato maaliyadeed ku soo gaadho. Qaar ka mid ah wadamada qaniga ku ah khayraadka ee ay haysato xaalad xoos u dhac oo ka jirta wax yaabaha aan aheyn khayraadka iyo daynta dawlada, qadarka wax soo saarka laga filayo in uu ka soo baxo kama badna muda ka badan (10-20 sano),hase ahaatee siyaasiyiintu waa ay sii wadaan si in aanu khayraadku dhamaaneyn. Isbar bar dhiga kirada laga qaado khayraadka ee aan joogtada aheyn iyo culayska dhaqaale ee jira muda dheer sida da'da dadka oo mustaqbalka waynaanaysa iyo kharashaadka caafimaadka la xidhiidha, kharashaadka baahiyaha bulsho, dhibta soo gaadha deegaanka, daymaha ay tahay in aynu bixino, iyo daynta adeega la xidhiidha waxay sii kordhin un doodo siyaasadeed oo aan caadi aheyn oo ku salaysan miisaaniyada mudada dheer,iyo in si taxadar leh kor loogu qaado miisaaniyada.

- Wadanka Norway, jaantuskani wuxuu ina tusinayaa hoos u dhaca ku yimid qulqulka lacagta xadidan ee ka imanaysa warshadaha siilada iyo kororka culayska jira ee hawlgabka. Wakhtiga fog si buuxda ayaa loo isticmaalay (Jaantuska 7). Wuxuu ka caawiyay in la sameeyo dood siyaasadeed balaadhan iyo taageero bulsho oo la sameeyo siyaasad miisaaniyad oo taxadar ku dhisan iyo joogtayn iyo in hanaan caawiya loo sameeyo hay'adaha. Sanadkii ka dambeeyay waa la horumariyay, waxayna astaan u noqotay miisaaniyad siyaasadeedkii Norway ayna noqotay mid dadka si buuxda u fahmaan sida uu tabinayo/tabinayso (Skanche 2003)

Jaantuska 1. Norway: qulqulka lacagta xadidan ee ka imanaysa warshadaha siilada iyo kharashaadka dadka hawlgabka ah (2001 Fiirsiga)

(Boqolkiiba inta ay ka tahay wax soo saarka dalka GDP)



Xogta: Skancke (2003).

A Qaabka ugu fiican ee nidaamkani iyada oo loo eegayo wakhtiga fog iyo qiimeynta waaritaanka iyada oo lagu darayo khayraadka ku jira dhulka iyo falanqeynta khatarta iman karta wakhtiga fog iyo qiimeynta adiga oo ku xisaabtamaya saameynta mustaqbalka ay yeelanayso siyaasadaada miisaaniyadeed. Waxay sii sheegi karta ama tayada ay yeelanayso iyo waligaba caqabadaha kaa hor iman kara waxay sidoo kale kaa caawin doontaa in aad isku diyaariso. Iyo in aad eegto sifo sharci oo taxdar leh loo isticmaalay khayraadka. Si mug leh waxay ku siin nidaam aad ku dajiso ujeedooyinka siyaasadaada maaliyadeed adiga oo awooda saaraya xaaladaha kala guurka, iyo sidii ama siyaasadii aad ku gaadhi laheyd.

MTEFs with extensive risk and long-term analyses also bring out clearly acute policy tradeoffs that are seldom considered explicitly. For example:

Habkan kharash garaynta ee wakhtiga lagu jiro iyo qiimeynta jiritaanka khatar weyn taasi oo keenaysa siyaasad ku haboon oo miisaaman taasi oo ay yar tahay in si cad loo helo. Tusaale ahaan:

- Muda gaaban iyo iyada oo ay jirta sare u kac ku yimid qiimaha khayraadka, maxay tahay waxa la luminayo ee u dhaxeeya kororka isticmaalka iyo kor u kaca miisaaniyad sanadeedka?

- Iyada oo la eegayo mudada dheer, maxay tahay waxa la luminayo ee u dhaxeeya isukeenida dhamaan hantida la taaban karo iyada oo loo eegayo hantida maaliyadeed ee cayiman?

- Muxuu yahay farqiga u dhaxeeya korodhka kharashka dawlada iyo hoos u dhaca waxyaabaha aan aheyn khayraadka iyada oo loo eegayo hantida go'an ee la rajaynayo in la helo marka uu dhamaado khayraadku?

Habkani waa in la dhaqan galiyo si qorshaha loogu darsado wax yaabaha aan la hubin ee dhici kara. Qorshaha muda fog waxaa loo asteeyay in looga hortago wax yaabaha aan la hubin ee dhici kara. Qiyaasaha kharash gareynta dawladu wuu kala duwanaan karaa iyada oo loo eegayo wakhtiga, culayska dhaqaale ee ay keenayso kharash la galayo mudada fog duruufo jira awgood way is badali karaan. Isbadalka ku yimaada habkani waa mid la jaanqaadaya duruufaha isbadalay iyo war bixinaha

imanayaana waxay kaa caawinayaan doorashada siyaasad cad oo ku wajahan u jeedooyinka wakhtiga dhaw iyo kan fogba, iyo saameynta ay yeelan karto.

Qaar ka mid ah wadamada qaniga ku ah khayraadka ayaa dhaqan galiyay, qaar koodna waxay qaateen habka ugu fudud ee nidaamka kharash garaynta wakhtiga lagu jiro taasi oo ay ku jirto khatarta soo wajahdo dakhliga iyo falanqeynta qorshaha mudada dheer.sanduuqa 3 wuxuu bixinayaa tusaalooyin.

Box 3. MTEFs in RRCs: Fiscal Risk and Long-Term Analyses

Wadanka Colombia marka la eego nidaamka wakhtiga lagu jiro, waxaa ku jirta falanqeynta khatarta ka iman karta daynta dawlada, marka la eego qoraalka dhaq dhaqaaqa maaliyadeed waxa uu saameyn ku yeelanayaa shuruucdii la meel mariyay sanadkii hore, iyo wuxuu sidoo kale qiime sare ugu joogi doonaa daymaha ay tahay in aynu bixino (Colombia sanadkii 2013)

Wadanka Nigeria sanadkii 2014-16 Nidaamka Kharashgareynta ee Wakhtiga Lagu Jiro iyo qorshaha maaliyadeed iyadood dood laga yeelanayo saameynteeda marka uu dhaco is badal deg deg ahi sida hoos u dhaca ku yimaada dhaqaalaha aduunka, hoos u dhaca sicirka saliida, iyo dhibaatooyinka la xidhiidha wax soo saarka saliida iyo dakhliyada kale ee aan saliida aheyn (Nigeria sanadkii 2014).

Dukumantiga miisaaniyada ee wadanka Norway waxa uu ka kooban yahay qoraal ah qorshaha siyaasada miisaaniyada ee xiliga lagu jiro iyo falanqeyn ku saabsan dhibaatada dhaqaale ee iman karta wakhtiga fog. Qoraal ku faah faahsan oo ku saabsan siyaasada wakhtiga dheer ee dhaqaalaha wadanka Norway ayaa la soo saaraa afartii sanadoodba mar.

Sanadkii 2015-17 nidaamkan wadanka Peru waxaa ku jira nidaamka faah faahsan ee DSA ee 10 sano gudohood (iyada oo ay ku jiraan hab ku dhisaan malo awaalka ee DSA) iyo xasaasiyada ay leedahay falanqeyntiisu iyo ogaanshaha halka uu kaga jiro nidaamka wakhtiga lagu jiro.

- Xasaasiyada isbadalada deg dega ah ee ku yimaadaa lee yihiin – dhibaatooyinka taban eek u imanaya ganacsiga ee la xidhiidha korimada yar ee ku timd dhaqaalaha Shiina, sare u kaca ku yimid lacagta maraykanka, iyo shakiga laga qabo kor u kaca khatarta ka iman karta suuqyada dhaqaalaha iyo tan gudaha sida (EL Nino") ee la xidhiidha fatahaada dabiicigaa. Waxay qiyaas ka bixinaysaa khatartu inta ay le'eg tahay, hadii iyo in ay ka muuqanayso miisaanka dhaqaalaha, dhaqaalaha dalka iyo sanduuqa miisaaniyada. Darsidani waxay qiimaynaysaa inta ay le'eg tahay ama sida loo samaynayo siyaasad miisaaniyadeed iyo in la sameeyo qorshe looga hortagayo hadii ay dhacdo hoos u dhac dhaqaale, taasi oo saameyn ku yeelan karta qaabka siyaasad miisaaniyadeed.

Wadanka Timor Leste, oo ay haysteen caqabado maamul iyo mid la lixiidha tayada, ayaa habkan adeegsaday iyada oo sal uga dhigaya (qiimeynta dakhliga sii jiraya) hantida laga helayo siilada ee wakhtiga fog. Dukumantiga miisaaniyada waxaa ku jira faah faahinta sida ay saameyntu u tahay xasaasi marka laga hadlayo qiimeynta dakhliga sii jiraya isbadalka ku yimid. Tijaabooyinka qiimeynta dakhliga sii jiraya ee hoos u dhaca qiimaha saliida, hoos u dhaca saliida iyo wax soosaarka gaaska, iyo kor u kaca qiimaha lagu soo saarayo wax soo saarka.

7. Waxyaabaha Sababa in Nidaamka kharash gareynta ee Xiliga lagu jiro.

Casharada iyo khibrada laga helay habkan ee aduunku waa mid kala duwan oo adag in sawir laga bixiyo, waxyaabaha ugu muhiimsan ee wax ku kordhin habkan lagu isticmaalay wadamada qaniga ku ah sidan ayay noqonaysaa:

Go’aamada siyaasadeed ee sarsare ee ka imanaya wasaarada maaliyada kuwaasi oo si faah faahsan uga hadlaya nidaamka miisaaniyada. Qaar ka mid ah wadamada qaniga ku ah khayraadka, siyaasada dhaqaale ee kharash gareynta kirada laga helo khayraadka iyada oo ay tahay in la sameeyo ama la xoojiyo nidaamkan sababtoo ah waxa laga lahaa u jeedo muhiim ah iyo sharci adag kaasi oo saameyn karaan doorashada siyaasado hufan iyo habka la raacayo ee miisaaniyada. Xaaladahani in taageerada laga soo bilo kor ayaa ugu muhiimsan.

Awooda in si dhab ah loo odoroso muhiimada wadarta miisaaniyada joogitaanka booska lagu qaabaynayo siyaasad leh qorshayaal iyo u jeedooyin cad. Wadamadani waxay wajahaan dhibaatooyin u gaar ah, kuwaasi oo laga hadli karo iyada oo si qorshaysan looga hadli doono cutubyada dambe, iyo qiimaynta hababkii aan kor ku soo xusnay.

Isdhex galin lagu sameeyo Habka isticmaalka kharashka iyo nidaamka maaliyadeed iyo qorshaha qaranka – tan muhiimada gaarka ah leh waxay tahay in wadamada qaniga ku ah khayraadku in ay yihiin kuwa ay kala baxsan yihiin hay’adaha qorsheeya iyo kuwa maamula kuwaasi oo aan si buuxda wada shaqeyn ula laheyn miisaaniyada, iyo waliba kharashaadka dheeriga ah ee yimaada iyo kharashaadka ka soo baxa khayraadka ee ay isticmaalaan cida awooda u lihi.

Hay’adaha sida buuxda u wada shaqeeya, gaar ahaan wasaarada maaliyada iyaga oo si gaar ah wada shaqeyn ula yeelanaysa hay’adaha kale.

Hufnaanta nidaamka miisaaniyada, iyada oo la raacayo nidaamka adage fulinta iyo warbixinta.

Go’aanka ah in la gudbiyo war bixinta. In la xoojiyo siyaasada iyo taageerada dadka ee nidaamkan..

In la helo kala horeysiin sax ah: iyada la iska jiraya in si dhakhso ah loo dhaqaaqo, hoostana laga bilaabayo, sida ugu fudud ee habkan loo adeegsan karo, kadibna si tartiib ah loo soconayo baahi badana loo qabo habka waxqabadka miisaaniyada ee xliga lagu jiro iyada oo bilowga faah faahinta lagu darayo gaar ah wadamada qaniga ku ah khayraadka.

Copyright © 2015
Bangiga Caalamiga ah ee dib-u-dhiska iyo Horumarka/Bangiga Adduunka

1818 H Street, NW
Washington, DC 20433
Telephone: 202-473-1000
Internet: www.worldbank.org

Qoraallada Bangiga Adduunka waxa loo soo daabacaa sidii natiijooyinka Bangigu uu ka gaadhay hawlihiisa loola wadaagi lahaa bahda horumara sida ugu dhakhsaha badan. Hadaba qoraalka maqaalkan laguma soo diyaarin hab waafaqsan nidaamka saxda ah ee loo maro qoraalada sida rasmiga ah loo saxay/tafatiray. Ilaha la soo xigtay ee qoraalka waxa laga yaabaa in ay yihiin qoraallo aan rasmi ahayn oo aan si toos ah loo heli karaynin. Qoraalkan waxa soo saaray shaqaalaha ama la taliyayaasha Bangiga Caalamiga ah ee dib-u-dhiska iyo Horumarka/Bangiga Adduunka. Waxa ay heleen, sida ay u fasireen, iyo gunaanadka lagu xusay qoraalkani kama turjumayo fikirka Agaasimayaasha Fulinta ee Bangiga Aduunka aa dawlahada Bangigu uu matalo. Waxa ay gabi ahaanba yihiin fikirka qoraaga mana ah in sinaba loogu nisbeeyo Bangiga Adduunka, ama hay'adaha la xidhiidha, ama xubnaha gudida agaasinka fulinta ee dalalka ay matalaan.
Bangiga Adduunku ma damaanad qaadayo saxsanaanta xogta ku jirta qoraalkan mana qaadanayo masuuliyadda caqaaqib kasta oo kal dhalata isticmaalkiisa. Xuduudaha, midabyada, diimaha, ama xog kale oo lagu muujiyo khariirad kasta oo qoraalkan ku jirtaa ma sheegayso go'aanka Kooxda Bangiga Adduunka ee xaaladda sharcinimo ee dhul kasta ama ansixinta ogolaanshaha xuduudahaasi.

Xuquuqaha iyo Ogolaanshaha
Qoraalka maqaalkan ku jiraa wuu xafidan yahay. In min-guuriyo iyo/ama in qayb ka mid ah ama dhamaan qoraalkan la naqilo/raro iyada oo aan ogolaansh loo helin waxa ay noqon kartaa xadgudub sharciga arintaasi khusayso. Bangiga Caalamiga ah ee dib-u-dhiska iyo Horumarka/Bangiga Adduunku waxa uu dhiiri galiyaa baahinta shaqooyinka uu qabto waxana uu u siin doonaa ogolaansho in dib loo isticmaalo qaybo ka mid ah qoraalkan sida ugu dhakhsaha badan.

Waydiimaha xuquuqaha iyo rukhsadaha khuseeya, ee ay ka miy yihiin xuquuqaha qiima dhimista, waa in lagu aadiyaa Xafiiska cidda soo Daabacday ee, Bangiga Adduunka, 1818 H Street NW, Washington, DC 20433, USA; fax: 202-522-2422; e-mail: pubrights@worldbank.org.